# Cudurka Fayraska *West Nile*

## Waa maxay cudurka fayraska *West Nile?*

Cudurka fayraska *West Nile* waa cudur fayras ah oo loogu gudbiyo inta badan dadka marka ay qaniinto kaneecada cudurka qabta. Fayrasku waa flavivirus, oo si dhaw ula xidhiidha fayraska dengue iyo fayraska qandhada jaallaha ah (yellow fever). Waxaa markii ugu horraysay lagu ogaaday Waqooyiga Ameerika 1999-kii wuxuuna ka jiray  Minnesota ilaa 2002.

## Waa sidee khatarta cudurka fayraska *West Nile?*

Dadka badankooda qaba infakshankan ma yeelan doonaan calaamad, ama astaamo hargab oo kale ayey yeelan. Calaamadaha sida caadiga ah waxay si dhakhso ah u muuqdaan 1-2 toddobaad gudahood marka ay qofka qaniinto kaneeco caabuqa qabtaa. Jirrada khafiifka ah oo uu keeno fayraska *West Nile* waxaa ka mid noqon kara qandho, madax-xanuun, murqo xanuun ama kala-goysyo xanuun, iyo finan.

In ka yar 1% (boqolkiba hal) dadka cudurka qaba waxaa laga yaabaa inay ku dhacaan encephalitis ama meningitis (caabuq maskaxda ama nudaha ku wareegsan). Dadka qaba xanuunka neerfaha ee daran waxaa laga yaabaa inay yeeshaan xummad badan, madax-xanuun, qoorta oo adag, iyo matag. Cudurku si dhakhso ah ayuu ugu gudbi karaa  jahwareer, isbeddel jawaabcelinta, suuxdin, miyir-beel, iyo naafow.

Dib uga soo kabashada cudurka neerfaha ee daran ayaa laga yaabaa inay qaadato bilooyin waxaana qaar ka mid ah saamaynuhu ay noqon karaan qaar joogto ah. Qiyaastii 10% (boqolkiba toban) dadka ay ku timaado jirrada habdhiska dareenka ee daran way dhiman. Ma jiraan daawayn cudurku leeyahay oo aan ahayn daryeel caafimaad. In qofka cusbitaal la dhigo ayaa daruuri noqon karta xaaladaha daran.

## Yaa halis ugu jira cudurka fayraska *West Nile?*

Cudurku wuxuu ku dhici karaa da' kasta. Hase yeeshee, bukaanada waayeelka ah iyo dadka difaaca jirkoodu daciif yahay waxay halis ugu jiraan cudur daran.

Gobolka Minnesota, xaaladaha cudurka fayraska *West Nile* ayaa laga helay gobolka oo idil. Meelaha ugu khatarsan ee fayraska *West Nile* waxaa ka mid ah gobolada beeralayda ee galbeedka iyo bartamaha Minnesota. Dadka ka shaqeeya dibadda ama ka qaybgalka hawlaha dibadda guriga ama shaqada ayaa halis wayn ugu jira maadaama ay kaneeco la kulmayaan.

## Noocee kaneecada ayaa faafisa fayraska *West Nile?*

Minnesota gudaheeda, waxaan haynaa 50 nooc oo kaneeco ah laakiin dhammaan kaneecada ma cunaan dadka. Cudur-sidaha ugu muhiimsan ee fayraska *West Nile* ee gobolkeena waa *Culex tarsalis*. Kaneecadan waxaa badanaa laga helaa meelaha furan sida beerta iyo cawska, halkaas oo ay ukunteeda dhigi karto biyaha taagan sida gacamada bullaacadaha iyo dhulalka qoyan. Kaneecadu waa duule xooggan, waxayna ka duuli kartaa dhawr mayl halka ay ka jirto. Waxay wax cuntaa fiidka iyo waaberiga.

Fayraska *West Nile* waxaa lagu joogteeyaa wareeg ku lug leh kaneecada iyo shimbiraha. Cimilada, tirada shimbiraha ee joogteeya fayraska, tirada kaneecada faafisa fayruska, iyo dabeecadda bani-aadanka waa arrimo saamayn kara goorta iyo meesha xaaladuhu ka dhacaan. Khatarta ugu badan ee cudurka fayraska *West Nile* ee Minnesota ayaa caadi ahaan ka soo bilaabma bartamaha Luulyo ilaa bartamahai Sebtembar, gaar ahaan sanadaha ka diiran heerkulka dhexdhexaadka ah.

## Maxay dadku samayn karaan si looga hortago cudurka fayraska *West Nile?*

Habka ugu wanaagsan ee looga hortagi karo cudurka fayraska *West Nile* waa inaad ka ilaaliso naftaada iyo qoyskaaga qaniinyada kaneecada:

- Iska ilaali dhaqdhaqaaqyada dibadda ee fiidkii iyo waabariga, oo ah wakhtiga ugu badan ee kaneecadu wax cunto, gaar ahaan laga bilaabo Luulyo ilaa Sebtembar.
- Isticmaal celiyayaasha leh DEET iyada oo la raacayo tilmaamaha calaamadda - ilaa 30% DEET waa ammaan waxayna waxtar u leedahay dadka qaangaarka ah iyo carruurta ka wayn da'da laba bilood. Celiyayaasha kale ee wax-ku-oolka ah waxaa ka mid ah *picaridin*, IR3535, iyo saliidda liindhanaanta eucalyptus. Kaliya isticmaalka alaabada ka diiwaangashanHay'adda Ilaalinta Deegaanka.
- Hore u sii daawee dharka oo ku qalabee alaabta permethrin-kujirto.
- Xiro shaadhadh iyo surwaalo balaq ah oo dhaadheer.
- Ka ilaali kaneecada gurigaaga adigoo ilaalinaya xidhnaanshaha daaqadaha iyo albaabada.

Si aad naftaada iyo qoyskaaga uga ilaalisid cudurada kale ee kaneecada ee Minnesota:

- Biyaha ka faaruqi hareeraha gurigaaga ugu yaraan toddobaadkii halmar si looga hortago kaneecadu inay u isticmaasho weelka meelo ay ku dhasho.
  - Baaldiyada, weelka ubaxa/soosariska, baaquliyada rabbaayadaha, qubaysyada shimbiraha, barkadaha kalluunka, iwm.
- Hubi majaroorada oo si joogto ah uga gur caleemaha si biyuhu si fiican u maraan.
- Giiji daboolada dabacsan si ayna biyuhu ugu ururin.
- Si adag u dabool weelka biyaha lagu kaydiyo (tusaale ahaan, foostada roobka).
- Ka buuxi godadka geedaha ee biyaha qabta wasakh ama ciid.
- Dib u warshadee taayirrada qadiimiga ah ama ku kaydi meesha ayna ka heli karin biyaha roobka.

Minnesota Department of Health
Vectorborne Diseases Unit
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164
651-201-5414
www.health.state.mn.us

West Nile Virus Disease – Somali (4/11/19)

*Si aad ugu hesho macluumaadkan qaab kale, wac 651-201-5414. Waxaa lagu daabacay warqad dib loo warshadeeyey.*